Waxbarashada beeraha iyo daaqa.

Ma doonaysaa in aad ka shaqeysid xayawaanka iyo daaqa?
Ma doonaysaa in aad shaqo doonatid kadib marka aad waxbarashada dugsiga sare aad dhameysid?
Ma doonaysaa in aad shaqeysid ama waxbarasho u doonatid dalal shisheeye oo dibada ah?
Ma doonaysaa in aad shirkad aad yeelatid mustaqbalka?
Ma doonaysaa in aad heshid wax barasho aad u balaadhan, oo aad ku horumarindoontid waxa aad xiiseenaysid?
Haddaba waxbarashadan beeraha iyo daaqu waa mid adiga ku gu haboon.

Waxbarashadan beeraha iyo daaqa, waxa aad baran doontaa cilmi aad u balaadhan oo ku saabsan xayawaanka,dabeecada,oo aad u horumarsan.Waxaad kaloo aad fursad aad u heli doontaa waxyaalo farabadan oo aad xiiseenjirtey in aad qabatid marka aad wakhtiyaada firaaqada ah aad heysatid.Tusaale ahaan sida,fardaha,shaqooyinka beeraha,ama kaluumeysiga iyo ugaadhsiga.sidaas ayaad ugu diyaar garoobi doontaa wixii shaqooyin ah,adigoo weliba u sameenaya si in aad xiiso uqabtid, ama waxaad qaadankartaa oo aad barankartaa casharo kale oo dheeraad ah, si markaa aad wax barashadaada aad u sii wadatid ilaa iyo heerjaamacadeed .

Dadka ka shaqeeya xayawaanka ,daaqa iyo beeraha, waxaa u caadinoqotay in ay leeyihiin shirkado,

Dhamaan dunida oo dhami wey leeyihiin ama waa laga helikaraa beero iyo daaq.
Hadii aad taqaanid ama ku hadashid luqado kale ama aad fahangaar ah aad u yeelatid dhaqamada kale ee jira,waxa markaa aad heleysaa fursado aad u badan oo aad ama shaqo ku helikartid ama waxbarasho aad debeda aad u doonankareysid, kadib marka aad waxbarashadaada dugsiga sare ee beeraha iyo daaqa aad dhameysid.

In aad shaqeysid ama waxbarashadaada aad wadatid.

Haddii aad dooratid waxbarashadan beeraha iyo daaqa waxa aad raadsankartaa shaqo kadib marka aad dhamaysid waxbarshada dugsiga sare.Haddii kale aad doontidna waxbarashadaada waad sii wadankartaa, waxaanad wax barasho aad ka dhigankartaa dugsiyada farsamada ama waxaad kadhigankartaa wax barashooyin gaa-gaaban jaamacadaha, tusaale ahaan sida jaamacada beeraha ee swiidhan(SLU)

Shaqooyinka aad helikareysid.

Marka aad dhameeysatid waxbarashadan beeraha iyo daaqa waxa aad raadsankartaa toos shaqooyin gaar ah.waxaanad kashaqeyn kartaa tusaale ahaan sida, Xanaaneenta fardaha,goobaha xayawaanka lagu dhaqo,ama xanaaneeye xayawaanka,

carwooyinka xayawaanka,cusbitaalada xayawaanka,abuurid,beeraha,meelaha lagu cayaaro cayaaraha goolofka,keynta ama jiqda,ugaadhsi,xanaaneenta ugaadhsiga,biyaha iyo kaluunka.

Waxbarashadu waxa ay ka koobantay

Waxbarashadan daaqa iyo beeruhu waxa ay ka koobantahay casharo. Casharo qaarkood waa qasab in dhamaan ardayda dhiganayasa dugsiga sare ey qaatan casharadaas. Waxaa jira laakin casharo kale oo ugaar ah ardayda dhiganaysa waxbarashada beeraha iyo daaqa oo kaliya. Waxaa intaa sooraaca in ay jiran casharo kale oo aad adigu gaar u doorankartid.

Waxbarashadani malaha takhasus guud oo ay dhamaan iskuulada oo dhami ay kawada simanyihiin. Iskuulkastabi isga ayaa waxbarshadiisan habtacliimeed oo u gaar ah u fushan doona,una qorsheysan doona.Takhasusyadu waxey noqonkaraan tusaale ahaan sida,aqoonta ciida ama dhooqada,keynta,beeraha,daryeelka iyo xanaaneenta fardaha,biyaha iyo kaluunka,ugaadhsiga,dabeecada iyo xanaaneenta dabeecada, iyo dalxiiska.

Waxaa laga yaabaa in aad jeceshahay in aad waxyaale kale kutakhasustid, islamarkaana doonaya in aad meel kale waxbarasho ka dhigatid? Waxaad weydiinkareysaa, kalana tashankartaa qofka uqaabilsan waxbarashada dugsiyada(studie och yrkesvägledare)haddii takhasus ka aad dooneysid in aad dhigatid aad ka helikartid dhamaan iskuulada dalka oo dhan.sikastaba jawaabta aad heshid hanoqoto mida ay doonto,wax aan shakikujirin in aad takhasuska waxbarashadeed aad si wadan kareysid.

Xidhiika suuqa shaqada

Marka aad ku jirtid waxbarashada daaqa iyo beeraha waxa aad xidhiidh la lahaan doontaa suuqa shaqada,Waxaad kaloo aad heysataa ilaa iyo 15 isbuuc oo dababar xirfadee iyo mid aqoon kororsi ah (APU) Tababarkaana waxaa kuu diri doona iskuulkaaga isaga oo markaas ay wada shaqayn ay kadhaxeyso iskuulkaaga iyo goobaha shaqo ee u dhaw meesha aad degen tahay.Meelaha aad kasameendoontid tababar xirfadeedka waxa ay hadba ay ku xidhantahay marba waxa ay tahay waxbarashadaad iyo takhasuskaagu.Waana habka u wanaagsan ee aad dad ku barankartid,xidhiidhna aad ku yeelankartid. Xidhiidhkaas oo aad markale aad kaga faaideeysankartid haddii aad istiraahdid shaqo raadso mustaqbalka.Haddii aad dooneysid in aad tababar xirfadeed aad kusameysid dibada meel aan aheen Swiidhen, way surtogal noqon karta in aad heshid fursadaas.

Mustaqbalka iyo shaqooyinka

Shirkadaha beeraha,dhirta iyo jardiinooyinka, iyo keyntaba waxa ay marwalba ay u baahanyihiin shaqaaloo cusub,laakinse in ay dad farabadan shaqaaleeysiiyaan uma baahna. In aad si fudud ama adag aad shaqo aad u heli doontid mustaqbalka,laakinse wax ey kuxidhanyahay waxa takhasuskaagu yahay ama aad baratay.iyo waliba haddii aad dooneysid in aad marba meelo kala fog-fog aad shaqo u tagtid.
Laakinse haddii aad wax barashadaada aad sii wadatid waxa markaa aad sifudud u heli doontaa shaqo kadib marka waxbarashadu ey kuu dhamaato.Haddii aad iminkaba aad ogtahay waxa aad damacsantahay ama aad rabtid in aad ku shaqeysatid mustaqbalka,waxa markaa aad furankartaa oo aad yeelankartaa shirkad aad adugu leedahay.